



Waa maxay doorka shaqaalaha kiiskaaga?

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona khatarta dhanka amaan ee la aqoonsaday taas oo keentay in ilmahaagu la geeyo meel ka baxsan guriga. Way kula qiimeyn doonaan baahiyahaaga waxayna kaa caawin doonaan adeegyada kaa caawin kara inaad diiradda saartp yaraynta ama baabi'inta halista iyo khatarada nabadgelyadeed.

Waa maxay Codsiga Ku-tiirsanaanta?

Codsashada ku-tiirsanaanta waa dukumiinti sharci ah oo loogu talagalay maxkamadda oo ku saabsan welwelka ah in canuggaaga lagu xadgudbay, la dayacay ama laga tegay oo ayna jirin waalid awood u leh inuu si amaan ah u daryeelo cunuggaaga. Codsashada ku-tiirsanaanta waxay maxkamadda ka codsanaysaa inay soo fara geliso oo ay ka ilaaliso canuggaaga waxyeelo iyo inay u oggolaato in Gobolka ay qaataan mas'uuliyadda ku-meelgaarka ah ee haysashada canuggaaga. Carruurta waxaa lagu soo celiyaa guriga markii khataraha nabadgelyadeed ee la aqoonsadey si badbaado leh loo xakameyn karo looguna maareeyn guriga qoyska.

Qareenka

Waxaad xaq u leedahay qareen. Haddii aadan awoodi karin qareen kuu gaar ah sababo la xiriira daqligaaga awgeed, maxkamadda ayaa mid kuu magacaabi doonta.

Mutadawaca GAL/GAL

Mutadawaciinta GALs (Guardians ad Litem) ama GALs (Guardians ad Litem) ayaa waxaa magacaabaya garsoorayaasha si ay ugu doodaan cunuggaaga. Mutadawaciinta GAL ama GAL wuxuu garsooraha ugu sheegaa dhageysiga maxkamada waxa ay aamminsan yihiin inay yihiin danta ugu wanaagsan ee cunuggaaga (kayar da'da 12) iyo waxa ilmahaagu u baahan yahay ama doonayo. Mutadawaciinta GAL ama GAL waxay ka shaqeyn doonaan inay hubiyaan in cunugaaga marwalba la tixgaliyo go'aan kasta oo maxkamaddu gaareyso.

Xiriirada Muhiimka Ah

Magaca Shaqaalaha Kiiska:

Ma u baahan tahay Garyaqaan?

Xafiiska Latalinta ee loo Xilsaaray:

Xafiiska Difaaca Dadweynaha

Taleefan: 360-586-3164

limeyl: opd@opd.wa.gov

www.opd.wa.gov/index.php/program/parents-representation

Magaca iyo Lambarka Mutadawaciinta GAL/GAL:

Xafiiska Udoodaha Xaquuqda Qoyska iyo Caruurta wuxuu baaraa cabashooyinka ku saabsan ficilada hay'adda ama waxqabad darada ee ku lug leh cunug ama waalid ku lug leh ilaalinta ilmaha ama adeegyada daryeelka ilmaha.

Taleefanka bilaashka ah: 1-800-571-7321

Taleefan: (206) 439-3870

www.ofco.wa.gov

Ka Warbixi Dayacaad/Kuxadgudub Cunnug

Wac 1-866-ENDHARM (1-866-363-4276)

oo ah taleefan 24 saacadood/toddobo maalmood shaqeyya kaas oo kugu xiri doona xafiiska kugu haboon.

www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse

Waxaad sidoo kale la xiriir kartaa Xafiiska DCYF ee Xariirada

Deegaanka adigoo kala xiriiraya 1-800-723-4831 si aad u fahanto

habraaca cabashada ee rasmiga ah.

www.dcyf.wa.gov/contact-us/constituent-relations

Hadaad jeceshahay nuqulada dukumintigaan qaab kale ama luuqad kale, fadlan la xiriir DCYF Qeeybta xiriirada (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION CWP_0044 | DSHS 22-1499 SM (04-2020) Somali

Fahamka Habraaca Maxkamada Carruurta

WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN:

- Laguula dhaqmo si xushmad leh
- Ogaato waxa ka dhacaya kiiskaaga iyo cunnugaaga
- Hesho adeegyada dhaqan ahaan u haboon
- Macluamadkaaga laga dhigo mid qarsoodi ah

WAXAA MASUULIYAD KAA SAARAN INAAD:

- Ka qeybgashid kulumada qorsheynta ee la wadaago
- Booqato cunnugaaga
- Ogeysiiso shaqaalaha kiiskaaga isbedelka lambarka taleefanka iyo cinwaanka
- Sharaxdo waxaad u baahan tahay si aad u ahaato waalid aamin ah

DOORKAAGU WAA INAAD:

- Muujiso waxa aad jeceshahay inaad u qorsheyso cunuggaaga
- La xiriirto shaqaalaha kiiskaaga oo aad ka qaybqaadato qorshaha kiiskaaga



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Muhiim ah in la ogaado

Waqti kasta inta lagu gudajiro howlaha maxkamada, garsooraha ayaa go'aansan kara in cunugaaga si amaana loogu soo celin karo guriga. Si kastaba ha noqotee, haddii aadan awoodin inaad sameyso isbeddelada lagama maarmaanka u ah si aad ku ilaaliso cunugaaga, waxaad waayi kartaa xuquuqda waalidnimada aad u leedahay cunugaaga. DCYF waxay ku siin doontaa taageerooyin iyo adeegyo kaa caawin doona inaad ka fogaato natiijadan iyo inaad la midoowdo cunugaaga.



Wakhtiga Habraaca Maxkamada Carruurta – Fadlan xaqiiji inaad kala hadasho qareenkaaga wixii ku saabsan dhageysiga maxkamadaada.

GUDBINTA CPS	CUNUGA WAXAA LAGU MEELEYNAYAA MEEL ILAALO LEH	DHAGEYSIGA DACWADA DARYEELKA GURYEYNTA <i>(Ilmahaaga waa lagu soo celin karaa guriga kadib mid ka mid ah dhegeysiyada maxkamada)</i>	DHAGEYSIGA DACWADA DARYEELKA GURYEYNTA EE SII SOCDA <i>(maxakamadaha qaarkood)</i>	DHAGEYSIGA XAQIIQ RAADINTA <i>(75 maalmood guduhood laga bilaabo gudbinta Codsiga Ku-tiirsanaanta)</i>	DHAGEYSIGA DHIIBITAANKA CUNUGA <i>(90 maalmood guduhood laga bilaabo gudbinta Codsiga Ku-tiirsanaanta)</i>	DHAGEYSIGA UGU HOREEYA EE DIB U EEGISTA KU TIIRSANAANTA	DHAGEYSIGA QORSHEYNTA JOOGTEYNTA	DIB U EEGISTA KU TIIRSANAANTA <i>(Soconaya 6 bilood kasta)</i>
Habraaca halkaan ayuu ka bilaabanaa	72 Saacadood Ugu Badnaan		30 maalmood	90 Maalmood		6 Bilood	12 Bilood	18 Bilood
Adeegyada Badbaadinta Ilmuhu (CPS) waxay helayaa gudbinta ku saabsan xadgudubka ama dayaca cunuga. Gudbinta ayaa la qiimeeyaa ama loo gudbiyaa baaritaan, Jawaabta Qiimeynta Qoyska ama la baaraa. Haddii loo malaynayo inay lagama maarmaan tahay in laga ilaaliyo ilmaha waxyeelada soo socota, maxkamadda ama hay'ada fulinta sharciga ayaa ka saari doonta ilmaha gurigaaga	Ilmaha waa laga saarayaa daryeelkaaga waxaana lagu meelaynayaa xarunka-baxsan gurigaaga ha ahaato qof qaraabo ah ama xarunta korsashada. Dhageysiga Daryeelka Guryeynta waxaa lagu qaban doonaa 72 saacadood gudahood marka cunugaaga laga saaro gurigaaga.	Dhageysigaan, waxaad weydiisan kartaa in maxkamaddu kuu magacowdo qareen. Garsoore ayaa go'aamiya haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu ku sii jiro xarunta daryeelka ee ka baxsan gurigaaga ama in si nabadgelyo leh laguugu soo celin karo. Waad weydiisan kartaa in ilmahaagu la joogo qaraabada halkii uu ku noolaan lahaa xarrun xannaano. Haddii ilmahaagu sii joogi doono xarun xannaano shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu dejin doona qorshaha booqasho joogtada ah.	Maxkamaddu mar labaad waxay go'aamineysaa haddii ilmahaagu sii joogi doono xarunta xanaanaada ee guriga ka baxsan ama haddii dib laguugu soo celin doono. Maxkamadu waxay dib u eegaysaa qorshaha booqashada qoyskaaga iyo halka ilmahaagu ku nool yahay.	Haddii aad sii waddo diidmada ku-tiirsanaanta, maxkamadda waxaa ay kaa qaadi doontaa bayaan marageed adiga iyo dadka kaleba taas oo ku saabsan khataraha nabadgelyada carruurta ee la aqoonsaday ee ku jira codsiga ku-tiirsanaanta. Maxkamaddu waxay xukumi doontaa in cunugaaga ku tiirsanaad Gobolka ama waxay xukumi doonaa in cunugaaga lagu celiyo daryeelkaaga oo ay meesha ka saaro ku tiirsanaanta ama waxay amri kartaa in cunugaaga uu amaana ku helayo gurigaaga iyadoo maxakamaduna ay kormeer samayn doonto.	Haddii ilmahaaga laga dhigo mid xarunta daryeel ku tiisan, waxay maxkamaddu amri doontaa inaad kaqeybqaadatid howlaha lagu yareynayo khataraha amni ee gurigaaga. Maxkamaddu waxay sidoo kale ka hadli doontaa meelaynta ama arrimaha booqashada inta lagu jiro dhagaysigan.	Maxkamaddu waxay dib-u-eegis ku sameyneysaa horumarka aad ka gaartay adeegyada waxayna tixgalineysaa haddii ay jiraan adeegyo dheeri ah oo xoojin kara awoodda aad u leedahay inaad siiso cunugaaga meel aamin ah. Maxkamaddu waxay go'aamin kartaa inay hadda nabadgelyo u tahay ilmahaaga inuu ku laabto gurigiisa iyadoo ku tiirsanaanta guriga ay maxkamadu kormeer ku samayn doonto.	Maxkamadu waxay go'aamisaa waxa qorshaha joogtada ah ee almahaaga ay noqon doonto iyo sidoo kale waxa qorshaha hadda ah ee cunugaagu noqon doonto haddii aadan awoodin inaad si nabadgelyo leh u ilaaliso cunugaaga.	Maxkamadu waxay fiirineysaa kaqeybgalkaaga adeegyada iyo haddii aadan sameynin horumar kugu filan waqtigaan la joogo, maxkamaddu waxay amri doontaa (xaaladaha qaarkood) in Gobolka uu soo gudbiyo codsi lagu joojinayo xuquuqdaada waalidnimada. Haddii codsiga joojinta la gudbiyo, waxaa jiri doona dhageysi halkaas oo qareenkaaga iyo qareenka Gobolka ay ku soo bandhigi doonaan caddeynta kiiskaaga. Garsoore ayaa go'aan ka gaari doona in la joojinaayo xuquuqdaada waalidnimada iyo in kale.

Kulumada Qorsheynta La Wadaago

Ku lug lahaantaada dhammaan kulammada qorsheynta la wadaago ee DCYF waa mid aad muhiim ah. Waxaad gacan ka geysan doontaa samaynta qorshaha kiiska qoyskaaga si aad uga takhalusto halista xagga nabadgelyada ah, inaad u abuurto yoolalka joogtada ah ee cunugaaga iyo inaad sameysato qorshe aad ku booqato cunugaaga. Waxa jira noocyo badan oo kulan ah oo aad adigu ka qayb geli doontid. Noocyada shirarka ugu badan waxaa ka mid ah Go'aan Gaarista Kooxda Qoyska (FTDM) iyo Qorsheynta Joogtada ah. Kulamadaani waa waqti aad u wanaagsan oo aad ku bandhigto aragtidaada, waxaad rumeysan tahay in loo baahan yahay in la beddelo iyo taageerada aad u baahan tahay si isbeddeladaani ay u dhacaan.

Booqashada Waalidka, Cunuga iyo Walaalaha

Qorshaha booqashada qoyska ee bilowga ah waxaa lagu soo saarayaa kulanka ugu horeeya ee Go'aan Gaarista Kooxda Qoyska (FTDM). Kaqeybgalkaaga booqashooyinka joogtada ah ee Wakhtiga Qoyska ee cunugaaga wuxuu adiga iyo cunugaagaaba idin ka caawinayaa inaad sii xoojisaan isku xirnaantiina iyo xiriiradiina inta lagu jiro mudada cunugaaga uusan kula nooleyn. Qorshaha booqashada qoysku wuxuu sharxi doonaa meesha, inta jeer iyo mudada booqashooyinka ay u dhici doonaan. Faahfaahinta kale waxaa ka mid noqon kara cidda joogi karta booqashada Wakhtiga Qoyska iyo heerka kormeerka. Qorshaha booqashada Wakhtiga Qoyska waxaa la cusbooneysiin karaa waqti kasta. Kala hadal qorshaha booqashada Wakhtiga Qoyska shaqaalaha kiiskaaga inta lagu jiro booqashooyinka billaha ah ee Wakhtiga Qoyska. Hadaad u baahan tahay caawimaad si aad u booqato ilmahaaga, shaqaalaha kiiskaaga ayaa kaa caawin kara.